

MACLUUMAADKAAGA. XUQUUQDAADA. WAAJIBAADKAYAGA.

## OGYEYSIISKA QAABKA

### ILAALINTA XOGTA

ee Isbitaalka Caruurta ee Minnesota

Digniintaani waxay ka hadlaysaa sida macluumaadka caafimaadkaaga loo isticmaali karo, loo siidayn karo iyo sidii aad adigu u heli lahayd.

Fadlan si dagan u akhri.

WUXUU DHAQAN GALAY NOOFEMBAR 1, 2016

#### **XUQUUQDAADA**

Marka ay timaado macluumaadka caafimaadkaaga, waxaa leedahay xuquuq cad. Qaybtaani waxay sharaxaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkayaga ku caawinaya.

#### **Ku hel qaab elektaroonig ah ama nuqul warqad ah macluumaadka caafimaadkaaga**

- Waad weydiisan kartaa in aad aragtid ama aad u heshid si elektaroonig ah ama warqad ah macluumaadkaaga caafimaadka. Dalabkuna waa in uu noqdaa mid qoraal ah.
- Waxaan ku siinaynaa nuqul ama macluumaadka caafimaadkaaga oo kooban, caadiyan waxay qaadataa 30 maalmood inaad heshid. Waxaa suurto gal ah in lagu weydiiyo kharash aan badnayn.

#### **Na weydii in aan saxno xogta caafimaadkaaga**

- Waad na weydiin kartaa in aan saxno macluumaadka caafimaadkaaga haddii aad u malaynaysid in khalad ku jiro ama uusan dhamaystirnayn. Dalabkaanna waa in uu noqdaa qoraal, noona sheegtaa sababta aad u rabtid isbadalka.
- Waxaan dhihi karnaa “maya” dalabkaaga, laakiin waxaan kuugu sheegi doonnaa sababta qoraal 60 maalmood gudahood.

#### **Waxaad weydiisan kartaa in loo wada xiriirno si qarsoodi ah**

- Waad noo sheegi kartaa qaabka aad u rabtid in aan kuula soo xiriirno (tusaale , guriga ama talafoon xafiis) ama in aan kuugu soo dirno warqan cinwaan kale. Dalabkaanna waa in uu noqdaa qoraal.
- Waxaan dhihidoonaa “haa” dhamaan wixii macquul ah.

#### **Waxaad noo sheegi kartaa waxa aan isticmaali karno ama aan la wadaagi karno meel kale**

- Waad na weydiin kartaa in aanaan isticmaalin ama aanaan la wadaagin qaar ka mid ah macluumaadkaaga daryeelka caafimaad, bixinta kharashka, ama hawlgallayada. Kuma khasbanin in aan yeelno dalabkaaga, waxaanna orankarnaa “maya” hadii ay waxyeelaynayso daryeelkaaga.
- Haddii aad adeega iyi daryeelka caafimaadka aad ka bixinaysid dhamaan jeebkaaga, noo sheeg in aanaan la wadaagin macluumaadka kharash bixinta ama hawgalyada shirkada caymiska caafimaadkaaga. Waxaan dhihidoonaa “haa” haddii uusan jirin sharci nagu khasbaya in aan la wadaagno macluumaadka.

## **Waxaad heli kartaa liiska kuwa aan la wadaagnay macluumaadka**

- Waad na weydiin kartaa inta jeer oo aan la wadaagnay macluumaadkaaga lixdii sano oo u danbaysay, yaan la wadaagnay, iyo sababta aan ula wadaagnay.
- Waxaan ku soo daraynaa waxyaalihii aan bixinay oo aan ka ahayn daryeel, bixin kharash iyo hawlgal daryeel caafimaad, iyo gudbin gaar ah (sida kuwo aad fasaxday adigu). Waxaan ku siinaynaa hal sano oo bilaash ah laakiin waxaan kaa qaadaynaa kharash macquul ah haddii aad na weydiisatid mid kale 12 bilood gudahood.

## **Qaado nuqul ka mid ah ilaalinta xogta**

Waxaad weydiisan kartaa nuqul warqad ah marka aad u baahantahay, xataa hadii aad nugula heshiisay in aad ku heshid iyada oo elektaroonik ah. Markiiba waan ku siin doonaa iyada oo warqad ah.

## **Qof u dooro in uu kuu hadla**

- Haddii aad qof siiso in qareen kaaga noqdo xaga macluumaadka caafimaadka ama qof uu noqdo mas'uulkaaga sharciyaysan, qofkaas ayaa xuquuqdaada ku hadlaya, samaynaya go'aanada macluumaadkaaga caafimaadka.
- Waxaan xaqiijinaynaa in qofkaasi awood buuxda uu yeesho, kuna matalo inta aanaan wax ficil ah qaadin.

## **Ka dacwood hadaad dareentid in xuquuqdaada lagu xadgudbay**

- Waad dacwoon kartaa haadii aad dareentid in xuquuqdaada lagu xad gudbay adigoo nagala soo xiriiraya adigoo isticmaalaya macluumaadka ku qoran dhamaadka digniintaan.
- Waxaad u dacwoon kartaa Wasaarada Cafimaadka ee Maraykanka iyo Xafiiska Xuquuq Insaanka ( U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights) adigoo warqad u diraya cinwaankan 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, ama wac 1-877-696-6775 ama fiiri shaashadaan [hhs.gov/hipaa/filing-a-complaint](https://www.hhs.gov/hipaa/filing-a-complaint).
- Ma aan kaa aargudan doono hadii aad naga dacwootid.

## **IKHTIYAARKAAGA**

Qaar ka mid ah macluumaadka caafimaadka, waad noo sheegi kartaa kuwa aan la wadaagi karno iyo kuwa kale. Haddii ay kuu cadahay qaabkii aan ula wadaagi lahay macluumaadkaaga caafimaad xaaladaha hoos ku qoran, nala hadal. Noo sheeg waxa aad rabtid inaan samayno, waana aan raacaynaa amarkaaga.

## **Xaaladahaan, waxaa leedahay xuquuqdaada iyo ikhtiyaarkaaga in aad noo sheegtid in aad:**

- La wadaagtid macluumaadka qoyskaaga, saaxiibadaada dhow, ama kuwa kale ee la socda daryeelka
- La wadaagtid macluumaadka xaaladaha gargaarka afooyinka
- In aad ku dartid macluumaadkaaga diiwaanka isbitaalka

Haddii aadan awoodin in aad noo sheegtid sida aad rabtid, tusaale, haddii aadan miyir qabin, waxaa suurto gal ah in aan la wadaagno macluumaadkaaga, haddii aan u malayno in dantaadu ku jirto. Sidoo kale aan la wadaagno macluumaadkaaga markii ay timaado in la sahlo dhibaato badan ama khatar kadis ah oo caafimaad ama amaan.

Xaaladahaan waxaa suurtoowda in aanaan la wadaagin macluumaadkaaga haddii aadan na siin ogolaansho qoraal ah:

- Ujeedooyin suuq gayn
- Iibin macluumaadkaaga
- Qoraalada daryeelada maskaxda ee badanaa la wadaago

#### **Wakhtiga lacag uruurinta:**

- Waxaa suurto gal ah inaan kula soo xiriirno marka aan lacagta uruurinayno, lakiin waad noo sheegi kartaa in aanaan kula soo xiriirin mar danbe.

#### **Xusuusin ootomatic ah ee daryeelka, daaweynta, iyo adeegyada:**

- Waxaa suurto gal ah in aan ku xusuusino daryeelkaaga, daaweyntaada, iyo adeegyada anagoo kuu reebayna fariin hadal ah ama kuwo qoraal ah.
- Waxaa suurto gal ah in aan ku xusuusino anaga oo isticmaalayna fariimo hore loo duubay iyo taleefano iskood isu dira.
- Xusuusinadaan iskood isu soo diraya waxaa la socda fariimo kuu sheegaya sidii aad u joojin lahayd in aadan helin mar danbe..

#### **SIYAABAHA AAN U ISTICMAALNO UNA SIIDAYNO**

##### **Sida caadiyan aan u isticmaalno ama ula wadaagno macluumaadkaaga caafimaadka?**

Caadiyan waxaan u isticmaalnaa ama ula wadaagnaa macluumaadka caafimaadkaaga sida soo socota:

- **Daryeelkaaga**

Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka una diri karnaa xirfadlayaasha kale ku daryeelaya.

*Tusaale: Dhakhtar kaadaaweynaya dhaawac ayaa weydiinaya dhakhtar kale guud ahaan caafimaadkaagu sida u yahay.*

- **Sida aan u maalmulno isbitaalkayaga**

Waxaan u isticmaali karnaa, lana wadaagi kartaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan u fulino shaqooyinkayaga, u haajino daryeelka, kuulana soo xiriirno marka loo baahdo.

*Tusaale: Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkaaga caafimaadka si loo agaasimo daryeelkaaga iyo adeegyadaada.*

- **Dalabka kharashka adeegaaga**

Waxaan u isticmaalaynaa, lana wadaagaynaa macluumaadkaaga caafimaadka si aan u dalbano uguna helno kharashkayaga caymiska caafimaadkaaga iyo kuwa kaleba.

*Tusaale: Waxaan siinaynaa macluumaadkaaga caymiskaaga caafimaadka si ay u bixiyaan kharashka adeegaaga.*

## **Sidee kale oo aan u istimaali karnaa ama ulawadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka?**

Waxaa naloo ogolyahay ama aan ku khasbanahay in aan siyaabo u gudbino macluumaadkaaga — badanaa waa si wanaag ugu jiro bulshada, sida caafimaadka guud ee bulshada iyo cilmi baarista. Marka hore waa in aan xaalado shuruuc ah aan dhamaystirnaa kahor inta aanaan ula wadaagin ujeedooyinkaan. Macluumaad dheeraad ah booqo shaashadan [hhs.gov/hipaa](https://hhs.gov/hipaa).

- **Gargaarka caafimaadka bulshada iyo xaaladaha amaanka**  
Waxaan ula wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka xaalado gaar ah sida:
  - Ka hor tagga Cudurada
  - Caawinta joojinta daawo
  - Sheegida daawada falceliskeedu duwanyahay
  - Sheegida xadgudubka, dactarada, ama dilka gurga
  - Ka hor taga ama yaraynta khatarada ku wajahan qof walba caafimaadkiisa iyo amaankiisa
- **Cilmi baarista**  
Waxaan u isticmaali karnaa, una gudbin karnaa macluumaadkaaga cilmi baarista. Waxaan gudbin doonaa oo kaliya kadib marka aan kaa helno ogolaansho, mararka qaarna waxaan ku weydiin doonaa in aad noo saxiixdid ogolaansho khaas ah.
- **U hogaasanka sharciga**  
Waxaan la wadaagi doonaa macluumaadkaaga haddii gobolka iyo dowlada feedaraalka sharcigoodu na farayaan, taas noo ay ka mid tahay Wasaarada Caafimaadka gobalka (Department of Health and Human Services) haddii ay rabto in ogaato in sharciga dowlada feedaraalka ah aan raacayno.
- **Ka jawaabida codsiga tabaruca xubnaha**  
Waxaan la wadaagi doonaa macluumaad caafimaadkaaga hayadaha uruuriya tabaruca xubnaha.
- **Waxaan la shaqaynaa baarayaasha caafimaadka iyo madaxda qabriyada**  
Waxaan la wadaagi doonaa macluumaadkaaga caafimaadka kuwa baara sababta dhimashada, baarayaasha caafimaadka iyo madaxda qabriya marka qofku dhinto.
- **Waxaan gudbin xaqiinta shaqaalaha, sharci fulinta, iyo codsiga hayadaha dowlada**  
Waxaan u isticmaali karnaa macluumaadka caafimaadkaaga una gudbin doonaa:
  - Dalabka xaqiinta shaqaalaha
  - Sababaha sharci fulinta ama booliska
  - Hayadaha kor ka ilaaliya waxyaalaha sharciga waafaqsan
  - Hawlaha khaaska ah ee dowlada sida ciidamada, kuwa lugta, iyo kuwa madaxwenaha ilaaliya
- **Ka jawaabida dacwooyinka iyo dhacdooyinta sharciga la xiriira**  
Waxaan u gudbin karnaa macluumaadka caafimaadka maxkamad hadii ay soo codsato ama uu amaro maamulku ama dalab maxkamad.

## **WAAJIBAADKAYA**

- Waa sharci in aan ilaalino xogta iyo amaanka macluumaadka caafimaadkaaga.

- Waan kula socodsiin doonaa markiiba haddii ey dhacdo xad gudub kaasoo khatar galin kara ilaalinta xogta ama amaanka macluumaadka.
- Waa in aan raacnaa hawlaha iyo dhaqamada xogta looga soo hadlay ogaysiisnaan, waxaana lagu siinayaa nuqul ka mid ah.
- Ma aan u isticmaali doono, lamana wadaagi doono macluumaadkaaga waxa aan ahayn waxa kor ku qoran haddii aadan adigu qoraal noogu sheegin in aan samayn karno. Haddii aad noo ogolaatid in aan samayn karno, waxaad joojin kartaa mar ale marka aad doontid. Nooqu soo sheeg qoraal marka aad isbadashid.

### **Badalida ogaysiisnaan**

Waxaan badali karnaa xadaynta ogaysiisnaan, isbadaladaan waxaa lagu dabiqi doonaa dhamaan macluumaadka aan kaa hayno. Ogaysiiska cusub waa kuu diyaar haddii aad ka soo codsatid xafiiskayaga ama shaashadayda.

### **MACLUUMAADKA, SU'AALAHA AMA, CABASHOYINKA**

#### **Privacy Officer**

Mail Stop CBC-3-Comp  
5901 Lincoln Drive  
Edina, MN 55436

Phone: 952-992-5470

Toll-free: 1-866-225-3251

Email: [privacy.officer@childrensMN.org](mailto:privacy.officer@childrensMN.org)